# YOOLASHA HORUMAR WAARA

## SUSTAINABLE DEVELOPMENT GOALS

2016-2030

Waxaa turjumay: Cabdiraxmaan Cismaan Gaas
Email: gaas96@gmail.com

@2018

# Hordhac (Iba bixin)

Shirkii Qaramada Midoobay ee Rio de Janeiro oo dhacay June 2012kii ayaa go'aamiyey in lala yimaado yoolal aduunyadu si guud ugu hirato oo xal u hela dhibaatooyinka Deegaanka, Siyaasadda iyo dhaqaalaha ee ka taaggan caalamka.

Yoolashani waxay bedelayaan kuwii la odhan jirey "Yoolasha Horumarineed ee Kunka sano" (Millinimum Development Goals –MDGs-) oo la hirgeliyey 2000 si loo xaqiijiyo ujeedooyin guud oo la isla gartay in wax lagaga qabto saboolnimada xad-dhaafka ah, Gaajada, cudurada dhimashada sababa iyo fidinta wax-barashada asaasiga ah oo caruurtu idil ahaan hesho.

Shan iyo toban (15) sano gudohood, Yoolashaasi (MDGs) waxay horseedeen horumar taabanaaya dhinacyo muhiim ah: Yareynta saboolnimada, helidda biyo iyo fayo-dhawr, hoos u dhigidda dhimashada caruurta iyo hagaajinta caafimaadka hooyada, Waxay sidoo kale dhaqaajiyeen dhaq-dhaqaaq caalamiya oo lagu xaqiijinaayo helidda wax-barashada asaasiga ah oo bilaasha, iyadoo lagu dhiirigeliyey wadamadu inay maal gashadaan mustaqbalkooda, MDGs waxay shaqo weyn ka qabteen la dagaalanka HIV/AIDS iyo cudurada kalee la daaweyn karo sida kaneecada/duumada iyo qaaxada.

Dhaxalkii iyo guulihii MDGs ku waxay ina siiyeen casharo qiima leh iyo khibrad aynu ku iba-furi karno yoolal cusub, si aynu u tiigsanno mayl kii ugu danbeeyey ee aynu ku cidhib tireyney gaajada, helidda sinaan buuxda ee lamaanaha, horumarinta adeegyada caafimaadka iyo in la xaqiijiyo in ilmo kastaa helo wax-barasho ka saraysa ta asaasiga ah. Yoolashan Horumar Waaraa waa baaq deg-deg ah oo loogu weecinaayo aduunka wadadii horumarka waara.

Bishii 9aad ee 2015kii in ka badan 190 hogaamiye ayaa ayiday 17ka yool ee horumar waara, si ay gacan uga

gaystaan inaynu tirtirno saboolnimada daran, la dagaalano sinaan la'aanta iyo cadaalad darrada iyo inaynu hagaajinno wasakhawga/dikhowga cimilada.

Dukumantigan waxaa iska leh Qaramada Midoobay, waxaanu ku daabacan yahay website-kooda www.un.org/sustainabledevelopment/sustainable-development-goals. Maadaama xilligii la tashiga shucuubta caalamka ee la diyaarinaayey Yoolashan iyo bar-tilmaameedyadooda; aanay Soomalidu helin door la tashi oo kufilan oo ay baahidooda ku gudbiyaan; duruufo badan aawadeed, ayaan isugu xil-qaamay turjumaadan inta karaankayga ah, si ay luuqadooda ugaga bogtaan; hayaanka aduunka ee 15ka sano ee soo socdana feedha uga raacaan.
Qofkasta oo gacanta ku haya masuuliyad ama horumarin waa u muhiin inuu akhristo oo fahmo qaybta ka khusaysan ama yoolka shaqadiisa khuseeya.

Maadaama luuqada lagu qorey dukumantigu tahay luuqad farsamo waxay u muuqataa sidii amar oo kale sida "Waa in la sameeyaa IWM" waxaa laga wadaa in qofkastaa niyadda ku hayo in masuuliyadda uu qayb ku leeyahay ayna tahay inuu qayb ka noqdo fulinta inta kaga aaddan.
Waxaan u mahadcelinayaa asxaabtii gacanta ka gaysatay inay soo akhriyaan oo tafatiraan ama ay baahiyaan oo uu ugu horeeyo Maxamed Xuseen (Rambow); oo suurto geliyay inuu si taxane ah ugu daabaco Wargayska Geeska Afrika ee uu masuulka ka yahay, iyo Abdijalil Dahir Afqarshe, Cabdiraxmaan Aadan iyo Cabdishukuur X. Muxumed oo qayb laxaad leh ka qaatay dhinaca tafatirka.

Cabdiraxmaan Cismaan Gaas
Email: gaas96@gmail.com
Twitter: @gaas96
Blog: http://abdirahman-gaas.blogspot.com

# TUSMADA DHUKUMANTIGA


1 Cidhibtirka Nooc kasta oo Saboolnimo ah ..................... 1
2 Dabar goynta Gaajada ..................... 3
3 Fayo-qabka & hagaajinta caafimaadka ..................... 5
4 Wax-barasho tayo leh ..................... 7
5 Sinaanta Lamaanaha ..................... 9
6 Biyo nadiifa iyo fayo-dhowr ..................... 11
7 Tamar nadiifa oo la gadan karo ..................... 13
8 Koboc dhaqaale iyo shaqooyin Wanaagsan ..................... 14
9 wershadaynta, curinta & kaabayaasha dhaqaale ..................... 16
10 Dhimista kala saraynta ..................... 18
11 Magaalooyin iyo bulshooyin xasiloon ..................... 20
12 Isticmaal masuuliyad ku dhisan ..................... 22
13 Wax ka qabadka Cimilada ..................... 24
14 Nolosha Biyaha ka hoosaysa ..................... 26
15 Nolosha Berriga ..................... 28
16 Nabad, cadaalad iyo haayado karti leh ..................... 30
17 Isu kaashiga yoolal kan ..................... 32

# 1 CIDHIBTIRKA NOOC KASTA OO SABOOLNIMO AH

**(Ending poverty in all its forms everywhere)**



Macnaha Saboolnimada darani waa ku noolaanshaha in ka yar $1.25 Maalintii

Inkasta oo horumar weyn laga gaadhay la dagaalanka saboolnimada 30kii sano ee ugu danbeeyey, hadana weli in ka badan hal bilyan qof ayaa maalintii ku nool wax ka yar $1.25. Yoolasha kale ma xaqiijin karno hadaynaan yoolkan ka gudbin, waa in aynu kala badh gaadhsiinaa dadka saboolnimadaa ku nool marka la gaadho 2030ka. Yoolkani wuu leeyahay 7 bar-tilmaameed oo kala ah:

1.1 2030ka waa in la cidhibtiro saboolnimada ba'an ee caalamka oo dhan; iyadoo wakhtigan lagu qiyaaso in 1.2 bilyan qof ku noolyihiin in ka yar 1.25 Doolar maalintii (taasoo ah halka ugu hoosaysa saboolnimada).

1.2 In dhamaadka 2030ka ugu yaraan kala badh hoos loo dhigo saamiga ragga, dumarka iyo caruurta ku nool saboolnimo daran; iyada oo lagu fiirinayo halbeegyada heer qaran .

1.3 In la helo hab lagu ilaaliyo bulshooyinka caalamka (social protection system) oo qaran kastaa yeesho, sida in dhammaan dadka saboolka ah iyo kuwa nugulba helaan caymis IWM.

1.4 2030ka, waa in la xaqiijiyo in ragga iyo haweenka danyarta ahi leeyihiin xuquuq u siman helitaanka dhaqaalaha, adeegyada asaasiga ah, lahaanshaha iyo maamulidda dhulka; sida dhaxalka IWM, iyo helitaanka mashaariic dhaqaale abuur sida daymaha, abuurista gacansi iwm.

1.5 2030ka, waa in la dhiso u adkaysiga bulshooyinka saboolka ah iyo kuwa nuguli u leeyihiin masiibooyinka dabiiciga ah ee ay keento doorsoonka ba'an ee cimilada sida masiibooyinka dhaqaale, bulsho iyo kuwa lama filaanka ah.

1a. In si habboon loo abaabulo ilaha kala duwan ee dhaqaale iyo wax soo-saar, sida in la isku kaashado

horumar waara oo la isku hallayn karo oo ay sameeyaan wadamada soo korayaa; gaar ahaan wadamada kori-taankoodu gaabinaayo, iyadoo la meel marinayo siyaasado iyo mashaariic lagu cidhibtirayo noocyada saboolnimada oo idil.

1b. In la sameeyo siyaasado iyo qaab-dhismeedyo wax ku ool ah oo heer qaran, heer gobol iyo heer caalami ah oo la jira (badhi taaraya) bulshooyinka saboolka ah iyo kuwa nugul; tixgelinna siinaya wada-horumarinta lammaanaha (ragga iyo dumarka), si loogu helo maalgelin habboon oo lagu cidhibtiro saboolnimada.

# 2 DABAR GOYNTA GAAJADA

End hunger

925 milyan Oo qof ayaa caawa gaajo la hoyanaaya caalamka

## Cidhibtirka gaajada, xaqiijinta cunto iyo nafaqo sugan iyo dhiirigelinta beero waara

Beeraleyda yar-yaree caalamku waxay u dabranyihiin deegaankooda, balse wasakhawga/dikhowga cimilada, burburinta deegaanka iyo deganaanshiinyo la'aanta siyaasadeed ayaa burburiyana khayraad koodii. Intaa waxa dheer, beeraha, kaymaha iyo kalluumaysigu ma bixiyaan oo keliya cunto nafaqo leh balse waxay abuuraan shaqooyin waxaanay gacan ka gaystaan caafimaadka iyo badhaadhaha bulshooyinka. Waa inaga iyo kartideen inaynu gaajada cidhibtirno 2030ka inagoo horu-manineyna beerasho/ beero waara iyo cunto la isku hallayn karo. Yoolkani wuxuu leeyahay 8 bartil-maameed oo kala ah:

2.1 2030ka, waa in la dabarjaro gaajada iyadoo la hubinayo in dhammaan dadka hadda saboolka ah iyo kuwa nuguliba helaan cunto ku filan oo nafaqo ahaanna isu dheelitiran sannadka oo dhan.

2.2 2030ka, waa in laga koraa noocyada nafaqo darrada oo dhan iyadoo la beegsanayo dhamaadka 2025kana bartilmaameedkii caalamiga ahaa ee yareynta dhimashada caruurta da'doodu 5ta sano ka yartahay ee u dhimata nafaqo darradda iyadoo loo marayo xoojinta nafaqada hooyada uurka leh iyo ta nuujinaysa iyo weliba nafaqaynta dadka da'da ah.

2.3 2030ka, waa in la laba jibbaaro waxsoosaarka beeraha siiba dakhliga dadka leh beeraha yaryar, gaar ahaan haweenka, xoolo dhaqatada/raacatada iyo kalluumay-satada iyadoo la xaqiijinaayo helitaanka iyo u sinnaanta lahaanshaha ee dhulka, maalgelinta iyo daymaha ku

habboon dadka saboolka ah.

2.4 2030ka, la helo koritaanka wax soo saarka beeraha iyadoo la dhisaayo awoodda iyo u adkeysiga beeralayda isbedelka iyo doorsoonka cimilada; sida daadadka xad dhaafka ah iyo masiibooyinka kale ee caqabadda ku ah horumarinta dhul beereedka iyo tayada carrada.

2.5 Wixii loo gaadho 2020ka waa in la xaqiijiyo joogteynta kala duwanaanta hiddaha ee abuurta midhaha, dhirta, iyo xoolaha iyo sidoo kale degel joogta (xayawaanka rabbaysan), iyadoo loo maraayo helitaanka abuur si wanaagsan loo maamuley oo heer qaran, heer gobol iyo heer caalami ah, loona sinaado faa'iidada abuurka hiddaha san ee midhaha iyo xoolaha sida caalamku ku heshiiyey

2.6 In la kordhiyo maalgashiga ama maalgelinta wax soo saarka iyadoo loo marayo isu kaashiga caalamka ee horumarinta kaabayaasha dhaqaale ee baadiyaha, cilmi baadhista beeraha iyo horumarinta tiknolojiyadda si loo keydiyo hiddo sidaha xoolaha iyo dhirta (DNA); si ay qayb uga qaadato horumarinta kartida wax soo saarka beeraha ee wadamada soo koraaya; iyo gaar ahaan kuwa horumarkoodu aadka u hooseeyo.

2.7 Waa in la saxaa, lana hagaajiyaa caqabadaha ganacsi ee haysta wax soo saarka caalamka, iyadoo sidoo kale meesha laga saarayo, dhammaan noocyada kabitaanka dhaqaale ee ay wadamada horumaray ku kabaan beeraleydooda si ay suuqa u soo geliyaan badeecad jaban oo tartami karta, waana in meesha laga saaraa kabitaanka si ay u sinnaadaan beeraleyda caalamku, fursadna u helaan beeralayda wadamada soo korayaa, sidii lagu heshiiyey shirkii Dooxa (Qadar) ee 2001dii

2.8 Waa in la meel mariyaa qawaaniin lagu hubinayo u sinaanta badeecadaha ee suuqyada caalamka, iyadoo la fududeynayo helitaanka xogta suuqa; iyo in la dhiiriyo keydinta cuntada si loo yareeyo sare u kaca qiimaha cuntada ee caalamka

# 3 FAYO-QABKA & HAGAAJINTA CAAFIMAADKA

Good Health and Well-Being

11 Caruura ayaa u dhinta Daqiiqad kasta Cudur laga hor tegi karo

## Fayo-qabka nolosha iyo hirgelinta badqabka da' kasta iyo meel kasta

Waxaynu joognaa xilligii ugu casrisanaa cilmiga sayniska iyo daawooyinka; welise cudurada laga hortegi karo, maandooriyaha aan la daaweyn Karin, si xun u adeegsiga khamriga, tahriibka iyo dhaawacyada wershedaha ka dhashaa waxay dilaan malaayiin qof sannad kasta. Meeshaad ka shaqayso iyo xaddiga lacagta kusoo gasha toona ma damaanad qaadaan wacyiga caafimaad ee aad u baahantahay. Waa in aynnu u istaagnaa in qofkasta, caruur iyo cirroolaba helo khayraadka uu ubaahanyahay si uu ugu noolaado nolo dheer oo caafimaad qabta. Yoolkani wuxuu leeyahay 13 bartilmaameed oo kala ah:

3.1 2030ka, waa in boqolkii kun (100,000) ee hooyo ee umushaba ugu yaraan la badbaadiyo 70% (boqolkiiba todobaadan) bartilmaameedkani waa in si ba'an loo dhimaa umul aroorka/ umul raaca hooyada caalamka oo dhan.

3.2 Wixii 2030ka loo gadho waa in meesha laga saaraa caruurta dhimata markay dhashaan, iyo weliba kuwa da'doodu 5ta sano ka hooseyso ee la badbaadin karo, siiba waddamada ay ku badantahay dhimashada dhallaanku.

3.3 2030ka, waa in la dabarjaraa faafitaanka daran ee cudurka Aydhiska (AIDs), Qaaxada (TB), Kaneecada ama duumada iyo cudurada u gaarka ah wadamada qorraxleyda ah (tropical diseases), iyo in lala dagaalamo Joonis cadka ama cagaarshowga, cudurada biyaha ka dhasha iyo kuwa la isu gudbiyaba.

3.4 2030ka, waa in hoos loo dhigaa ugu yaraan boqolkiiba soddon (30%), dhimashada dhiciska u dhinta cudurrada aan la isu gudbin iyadoo la xoojinaayo ka hortagga iyo daaweyntaba

iyo weliba in sare loo qaado daryeelka dadka xanuunka dhimirka qaba iyo faya-qabka guud ee shucuubta caalamka.

3.5 Waa in la xoojiyaa ka hortagga iyo daaweynta xadgudubyada ka dhasha mukhaadaraadka sida adeegsiga khamrada rabshadaha wata ama gacan ka hadalka kiciya IWM.

3.6 Wixii loo gaadho 2020ka waa in kala badh la dhimaa dhimashada iyo dhaawacyada ay sababaan shilalka waddooyinku ama gaadiidku.

3.7 2030ka, waa in si siman loo helo daryeelka caafimaad ee taranka qoyska sida kala korinta ilmaha, xogta iyo macluumaadka ku saabsan iyo aqoonteedaba iyadoo la dhex gelinaayo caafimaadka taranka, qorshayaasha iyo mashaariicda horumarineed ee waddan kasta.

3.8 2030ka, waa in lawada helaa caymis caafimaad sida in la meeleeyo adeegga caafimaad ee aasaasiga ah, daaweyn ay awoodaan shucuubta saboolka ahi iyo tallaal uu heli karo qof kastaa.

3.9 2030ka, waa in si weyn hoos loogu dhigaa tirada dhimashada iyo dhaawaca ay sababaan kiimikooyinka khatarta ahi, wasakhowga iyo sumowga biyaha iyo carrada iwm.

3.10 Waa in la xoojiyaa fulinta qorshayaasha iyo qaababka ay hay'adda caafimaadka adduunku (WHO) u dhigtay xakamaynta iyo dabar goynta Qaaxada ee wadamada oo dhan.

3.11 Waa in gacan la siiyaa cilmi baadhista iyo horumarinta tallaalka iyo daawooyinka cudurada la is qaadsiiyo iyo kuwa aan la kala qaadinba; kuwaas oo dhibaato ba'an ku haya wadamada soo koraaya.

3.12 Waa in la helo daawo ay awoodaan ama iibsan karaan dadka saboolka ahi; iyadoo la tixgelinaayo baaqii shirkii Dooxa (Qadar) ka dhacay 2001dii kaasoo lagu cadeeyey xaqa wadamada soo korayaa u leeyihiin helitaanka daawooyin tayo leh oo ay iibsankaraan iwm.

3.13 Waa in la kordhiyo maalgelinta caafimaadka iyo daryeelka shaqaalaha caafimaadka ee wadamada soo koraya siiba kuwa kori-taankoodu liito (least developed countries) iyo jasiiradaha yaryar ee caalamka.

3.14 Waa in la xoojiyaa kartida iyo awoodda wadamada oo dhan siiba kuwa soo koraya si goor hore digniino looga helo khataraha soo wajaha caafimaadka wadamada iyo guud ahaan dunida ba.

# 4 WAX-BARASHO TAYO LEH

Quality Education

170 milyan qof ayaa laga dulqa-adi karaa saboolnimada haddii dhamaan ardaydu bartaan Xirfadda akhriska asaasiga ah

## Helidda wax-barasho tayo leh oo loo dhanyahay loona simanyahay iyo fursado wax-barasho markasta, (Ensure inclusive and equitable quality education and promote livelong learning opportu-nities for all)

Maadaama shucuubta caalamku korayaan, khayraad badan iyo siyaasado ayaa loo baahanyahay si loo hubiyo in arday kastaa helo wax-barasho tayo leh. Aduunku wuxuu u baahanyahay labo milyan oo macallin iyo afar milyan oo fasal oo cusub si dhab looga dhigo in arday kastaa wax-barasho helo. In si buuxda loo helo wax-barasho tayo leh waxay tallaabada kowaad u tahay ku guuleysashada horumar waara, tirtirada saboolnimada, sinnaanta ragga iyo haweenka iyo karti gelinta haweenka. Aynnu u istaagno maalgashiga wax-barasho tayo leh inagoo meel marineyna in dugsiyada hoose iyo kuwa sareba bilaash u noqdaan arday kasta 2030ka. Yoolkani wuxuu leeyahay 10 bar-tilmaameed oo kala ah:

4.1 2030ka, waa in la xaqiijiyaa in idil ahaanba ubadku (Wiilal iyo Hablaba) dhamaystirtaan wax-barashada asaasiga ah iyo ta dugsiyada sare oo tayaysan; taasoo u horseedi doonta ubadka horumar waxbarasho oo waara.

4.2 2030ka, waa in la hubiyaa in dhammaan ubadku helaan daryeelka iyo barbaarinta caruurnimo oo tayo leh iyo wax-barashada dugsiga ka hor; si ay isugu diyaariyaan dugsiga hoose.

4.3 2030ka, waa in ragga iyo dumarkuba fursad siman u heli karaan dugsiyada farsamada gacanta iyo kuwa xirfadaha oo tayo sare leh iyo sidoo kale aqoonta heerka sare sida Jaamacadaha iwm.

4.4 2030ka, waa in si weyn loo kordhiyaa tirada dhallinyarada iyo dadka waa-wayn ee leh xirfad ay ku shaqaystaan sida farsamada gacanta iyo xirfadaha oo ay ku helaan shaqo u qalanta iyo hal-abuurnimo ganacsi.

4.5 2030ka, waa in meesha laga saaraa u kala sad-burinta wax-barasho ee Wiilasha iyo Hablaha; si loo hubiyo iney dhammaan helaan wax-barasho iyo xirfado tayo leh, gaar ahaan dadka nugul oo ay ku jiraan dadka naafada ah iyo caruurta baahiyaha gaarka ah leh.

4.6 2030ka, waa in dhammaan dhallinyarada caalamka iyo badi dadka waaweyni Rag iyo Dumarba ka haqab beelaan xirfadda qorista iyo akhriska

4.7 2030ka, waa in la xaqiijiyaa in dhammaan ardaydu da'kasta oo ay yihiinba helaan aqoonta iyo xirfadda ay u baahanyihiin si loo hubiyo in lagu gaadho horumar sugan oo koraya oo damaanad qaada dhawrista xuquuqda aadamaha, u sinaanta lammaanaha ee fursadaha, horumarinta nabadda iyo codka dadka aan hadda xaqooda sheegan karin iyo in sidookale la isku ixtiraamo kala duwanaanshaha dhaqamada iyo caadooyinka iyadoo loo adeegsanaayo in dhaqamadaasi qayb ka noqdaan horumarka caalamka.

4.8 Waa in la dhisaa lana tayeeyaa adeegga waxbarashada ee caruurta, dadka naafada ah iyadoo laga eegayo weliba dhinaca lammaanaha iyo abuurista goobo waxbarasho oo ku habboon.

4.9 Waa in si weyn loo ballaadhiyaa tirada deeqaha wax-barasho ee caalamku siiyo wadamada soo koraaya, gaar ahaan wadamada koritaankoodu liito sida wadamada jasiiradaha yaryar iyo Afrika si loo xoojiyo is-qorista waxbarashada sare, oo ay ku jiraan xirfadaha iyo takhasusyada gaarka ahi; sida tiknologiyadda casriga ah, injineerinka, sayniska iwm.

4.10 2030ka, waa si weyn loo kordhiyaa tirada macallimiinta tababarka sare leh ee caalamka iyadoo la xoojinaayo isu kaashiga caalamka ee tababarka macallimiinta wadama soo koraaya; gaar ahaan wadamada koritaankoodu liito iyo jasiiiradaha yaryar.

5

# SINAANTA LAMAANAHA

Gender Equality

Shaqada haweenku waa 70% Saacadaha adduunka la shaqeeyo, hadana keliya 10% Ayay ka helaan dakhliga aduunka

## Xaqiijinta sinnaanta laammaanaha iyo kartigelinta haweenka iyo hablaha (Achieve gender equality and empower all women and girls)

Sinnaan la'aanta jinsiga ku salaysani si weyn ayay uga jirtaa bulsho kasta, Haween badan ayaa weli la' fursado shaqo, wax-barashada asaasiga ah iyo adeega daryeelka caafimaad, waxaanay mutaystaan tacadiyo iyo takoorid. Xisaabtu wey sahlantahay: Wadamada sinnaantu sareyso saboolnimadu wey yartahay, dhaqaaluhu si weyn buu u kobcaa, noloshuna wey fiicantahay. Aynu u istaagno hagaajinta fursadaha qofkasta inagoo meesha ka saareyna caqabadaha hortaagan ka qayb galka haweenka ee dhaqaalaha, arrimaha bulshada iyo siyaasadda.Yoolkani wuxuu leeyahay 9 bar-tilmaameed oo kala ah:

5.1 In adduunyada oo dhan laga cidhibtiro nooc kasta oo takoor ah oo ka dhan ah Haweenka iyo Hablaha/Gabdhaha.

5.2 Cidhibtirka dhammaan noocyada gaboodfallada ka dhanka ah Haweenka iyo Hablaha ee ka dhaca xarumaha dawliga ah iyo goobaha gaarka loo leeyahay, tacadiyadaas oo ay ka mid yihiin ka gacansiga jidhkooda, tahriibka, iyo noocyada kale ee xadgudubyada ah.

5.3 Dabargoynta caado dhaqameedyada dhibaatada leh sida gudniinka gabdhaha, guurka qasabka ah iyo faroxumaynta caruurta.

5.4 Waa in tixgelin gaara la siiyaa helitaanka daryeel lacag la'aan ah iyo in fiiro gaara loo yeesho shaqo hoosaadka guryaha iyadoo la meel marinaayo shuruuc lagu hagaa-jinaayo shaqaalaha rayidka ah, kaabayaasha dhaqaalaha iyo siyaasado dammaanad qaadaaya hagaajinta adeega

bulshada iyo ilaalintoodaba si loo hubiyo in qoysku wadaago masuuliyadda guriga  sifo waafaqsan hab-dhaqanka wadankaas.

5.5 Waa in la meelmariyaa ka qayb galka Haweenka ee hogaaminta iyo siyaasadda; sidoo kale waa in ay helaan fursad la siman ta ragga markay noqoto go'aaminta siyaasadda, dhaqaalaha iyo masiirka ummadda.

5.6 Waa in la hubiyaa helitaanka xuquuqda iyo caafimaadka taranka si loo dhaqangeliyo bayaankii shirkii Bijiin iyo go'aamadii kasoo baxay shirarkii ka danbeeyey ee dib loogu eegay bayaanka shirkaas.

5.7 Waa in dib u eegis lagu sameeyaa si loo hubiyo in Haweenku helaan xuquuq dhaqaale oo la mid ah ta Ragga iyo sidoo kale xuquuqda lahaanshaha dhulka, helitaanka adeegyada dhaqaale, dhaxalka iyo khayraadka kale iyadoo loo eegaayo xeerarka wadankaa.

5.8 Waa in la horumariyo adeegsiga tiknolojiyadda ee haweenka si loo kobciyo awoodda Haweenka ee ka qayb qaadashada horumarka casriga ah.

5.9 Waa in la meel mariyaa siyaasado wax ku ool ah iyo shuruuc la fuliyo oo sare u qaadaaya xuquuqda lamaanaha iyo kartigelinta haweenka iyo hablaha heerkasta oo ay yihiinba.

# 6 BIYO NADIIFA IYO FAYO-DHOWR

**Clean water and sanitation**

Dad badan waxay haystaan Tilifoonka Gacanta Mana laha Musqulo

## Helida hab sugan oo lagu maamulo biyaha iyo fayo dhawrka

In ka badan kala badh qoysaska aduunka ayaa ku hela biyo nadiifa guryahooda; tirada dadka aan helin fayo-dhawr way sii kordhaysaa markasta oo dadku u hayaamaan isku raranta iyo magaalooyinka. Cududarada laga qaado biyaha wasakhaysani waxay dilaan dad ka badan inta tacadiyada iyo dagaalada ku dhimata. Inagoo muhimada kowaad siinayna helidda biyo nadiifa waxaynu horumarin karnaa caafimaadka iyo nolosha malaayiin qof. Yoolkani wuu leeyahay 8 bartilmaameed oo kala ah:

6.1 2030ka, waa in gebi ahaanba shucuubta caalamku ka haqab-beesho biyo ku filan oo nadiifa.

6.2 2030ka, waan in fayadhawr iyo nadaafad ku filan helaan shucuubta caalamku iyadoo la basrinayo saxarada bannaanka taalla; xanaanayn gaarana la siinayo dadka nugul sida haweenka iyo dhallaanka.

6.3 2030ka waa in la horumariyaa tayeynta biyaha; iyadoo la yareynaayo wasakhawga iyo daadinta wasakhda (qashinka), iyo ku siidaynta kiimikada halista leh ee hawada iyo biyaha lagu sii daayo. Waa in kala badh la dhimaa biyaha wasakhaysan iyadoo la xoojinayo wershadaynta iyo dib u hagaajinta biyaha.

6.4 2030ka, waa in si weyn loo kordhiyaa habsami u adeegsiga biyaha ee dunida iyadoo la hubinayo in si masuuliyadi ku jirto loo soo saaro loona isticmaalo biyaha nadiifta ah; si looga baxo cidhiidhiga biyaha; loona dhimo tirada dadka ay hayso dhibaatada biyo yaraantu ee ku nool caalamka.

6.5 2030ka, waa in la hirgeliyaa iskaashi caalamku ka yeesho

habsami u maamulidda biyaha sida in qaramadu iska kaashadaaan wadaagista iyo habsami u maamuladda khayraadka biyaha.

6.6 2020ka, waa in la ilaaliyaa; lana soo celiyaa hanaanka deegaan ee biyaha (water-related ecosystems) ee caalamka sida buuraha, kaymaha, dhulka biyo qabatinka leh, dooxooyinka, webiyaasha iyo harooyinka.

6.7 2030ka, waa in la xoojiyaa isu kaashiga caalamka ee biyaha iyadoo la dhisayo awooda iyo kartida wadamada soo korayaa ay u leeyihiin mashaariicda biyaha iyo fayo-dhowrka sida biyo soo saarka, xareedeynta, habsami u adeegsiga biyaha, wershadeynta iyo dib u sifeynta biyaha iyo weliba tiknolojiyadda casriga ee gacanta ka geysata arrimahaas.

6.8 Waa in la taageeraa; gacan weynna la siiyaa ka qaybgalka bulshooyinka ee hagaajinta biyaha iyo maamulidda fayo-dhowrka.

# 7 TAMAR NADIIFA OO LA GADAN KARO

**Affordable & clean energy**

1.1 Bilyan Qof ayaa
ku nool Koronto la'aan

## Hubinta in la helo Tamar (energy) sugan, la isku hallayn karo oo la gadan karo

Tamar nadiifa oo sugani keliya kuma xidhna deegaanka. Ku dhawaad 4.3 milyan qof ayaa sannad kasta u dhinta qiiqa guryaha dhexdooda oo loo adeegsado xaabo ama gaas wasakhaysan. Dhimashadaasi waa wax laga hortegi karo. Weynu suurto gelin karnaa in qofkastaa helo tamarta la cusboonaysiin karo 2030ka.  Shan bar-tilmaameed ayuu leeyahay yoolkani oo kala ah:

7.1 2030ka, waa in la hubiyaa in caalamku ka haqab-beelo Tamar casri ah oo la isku halleyn karo lana gadan karo.

7.2 2030ka, waa in sare loo qaadaa xaddiga tamarta la cusbooneysiin karaa ka tahay tamarta caalamka (badinta adeegsiga tamarta la cusbooneysiin karo) renewable energy.

7.3 2030ka, waa in la laba jibaaraa horumarinta heerka tamarta casriga ah ee caalamka.

7.4 2030ka, waa in la horumariyaa iskaashiga caalamka ee fududeynta helitaanka tamar nadiifa, cilmi baadhisyo, farsamada (tiknolo-jiyadda) casriga ah, oo ay ku jiraan tamarta la cusbooneysiinkaro, habsami u adeegsigeeda iyo adeegsiga farsamooyinka casriga ee tamar shiidaal oo nadiifa lagaga dhalinkaro hadhaadigii noolayaasha (fossil-fuel). Sidoo kale waa in la xoojiyaa maal-gashiga kaabayaasha tamarta iyo farsamooyinka casriga ah ee lagu heli karo tamar nadiifa.

7.5 2030ka, waa in la ballaadhiyaa; lana horumariyaa farsamooyinka casriga ee lagu helayo adeeg tamareed oo casri ah oo ay helaan wadamada soo korayaa, siiba kuwa horumarkoodu gaabinayo, wadamada jasiiradaha yaryar ee soo koraya iyo wadamada aan badda lahayn ee soo koraya iyadoo lagala shaqaynayo mashaa-riicda horumarineed ee ay danaynayaan.

# 8 KOBOC DHAQAALE IYO SHAQOOYIN WANAAGSAN

**Good Jobs and Economic growth**



64% dadka dharka ka shaqeeya wadanta Haiti waxay qaataan mushqaayadda ugu hooseysa ee la bixiyo saacadii

## Horumarinta iyo joogtaynta koboc dhaqaale, shaqaalaysiin wax-tar leh oo laga simanyahay, iyo shaqooyin haboon oo cidkastaa hesho

Dhibaatada dhaqaale waxay qayb ka qaadatay tayada iyo tirada shqooyinkii caalamka. Illaa 190 milyan ayaa shaqo la'aan ah, iska dhaaf koboca dhaqaalee shaqo helistaa furaha kowaad ah, iyo sidoo kale in si siman loo wada hodmo. Helidda badhaadhe dhaqaale iyo fursado shaqo lagu samayn karo waa hal-xidhaalaha u yaalla helidda bulshooyin deggan oo nabad ah.Yoolkani wuxuu leeyahay 11 bartil-maameed oo kala ah:

8.1 Waa in la joogteeyaa koritaanka dhaqaale ee shakhsiga ah (per capita economic growth) iyadoo loo eegayo xaaladda wadanka, gaar ahaan in boqolkiba 7 la kordhiyo Wax soo soosaarka maxalliga ah ee waddamada horumarkoodu hooseeyo.

8.2 Waa in la xaqiijiyaa wax soo-saar heersare ah, iyadoo la adeegsanayo kala rogga midhaha (isku bedelka), horumarinta tiknologiyadda casriga, iyo hal-abuurnimadda ganacsiga, iyadoo awoodda la saaraayo, shaqaaleysiin xoog leh iyo waxy-aabaha qiimaha u leh xoojinta dhaqaalaha.

8.3 Hirgelinta siyaasado badhitaaraaya horumar ka, wax soo saarka, shaqo abuurka, Hal-abuurnimada ganacsiga iyo abuurista shirkadaha heerka dhexe, iyadoo la suurtogelinayo adeegga helitaanka dhaqaale lagu abuuro ganacsi.

8.4 Waa in qaab horumarsan loo hirgeliyaa 2030ka, in si masuuliyadi ku jirto loo soo saaro loona isticmaalo khayraadka dunida, iyadoo koboca dhaqaalaha laga madax banaynaayo nabaad-guurka deegaanka ku dhacaya, sida in la hirgeliyo qorsheyaal toban sano ah oo lagu xaqiijinayo 'waxsoosaar iyo isticmaal isku dheellitiran oo ay horseed ka noqdaan waddamada horumaray.

8.5 2030ka, waa in si buuxda loo xaqiijiyo shaqo abuur wanaagsan oo ay ka simanyihiin Ragga iyo Haweenku, dhallinyarada iyo dadka naafada ah, iyadoo la suurto gelinayo u sinnaanta dheefta shaqada.

8.6 2020ka, waa in si weyn loo yareeyo saamiga dhallinyarada aan shaqeyn (dhallinyarada bilaa camalka ah); ee weliba aan lahayn aqoon iyo tababar kufilan.

8.7 Waa in tallaabo degdeg ah la qaado si loo tirtiro shaqooyinka la isku dirqiyo (khasbo) iyo idleynta adoonsiga casriga ah, tahriibinta iyo dabargoynta qaabkasta oo lagu shaqaaleysiinayo ama askareynayo caruurta. 2025ka, waa in la cidhibtiraa dhammaan noocyada shaqaalaysiinta caruurta.

8.8 Waa in la ilaaliyaa xuquuqda shaqaalaha, lana hagaajiyaa goobaha shaqo ee shaqaalaha oo dhan oo ay kujiraan shaqaalaha muhaajiriinta ah; gaar ahaan dumarka iyo shaqaalaha qadaa ma dhergaha ah (shaqaalaha aan joogtada ahayn).

8.9 2030ka, waa in la meel-mariyaa siyaasado xoojinaya dalxiis qiimoleh oo shaqooyin abuura iyadoo la dhiirigeliyo dhaqamada iyo wax soosaar ka maxalliga ah.

8.10 Xoojinta tayada iyo awooda siyaasadaha dhaqaale ee hay'adaha maxalliga ah, si loodhiirigeliyo loona ballaadhiyo helitaanka bangiyo, caymisyo iyo adeegyo dhaqaale oo ay helaan dhammaan shucuubta caalamku.

8.A Waa in la xoojiyo gacan taageero ee la siiyo ganacsiga waddamada soo koraya, gaar ahaana kuwa koritaankoodu liito, iyadoo la abuurayo qaabab wada shaqayneed oo hurmarsan oo farsamo ahaanna taageeraaya ganacsiga wadamada soo koraya.

8.B 2020ka, waa in la sameeyo lana hirgeliyo qorsheyaal heer caalami ah oo lagu shaqaaleysiinayo dhalinyarada, iyo meel-marinta heshiisyo lagu sugayo shaqaaleysiinta caalamka oo ay horseed ka tahay hay'adda shaqaalaha aduunku.

# 9 WERSHADAYNTA, CURINTA & KAABAYAASHA DHAQAALE

**Industry, innovation and infrastructure**

Dhisidda xidhiidh xoogan oo dhexmara bulshooyinka reer miyiga ahi waxay ku kobcin kartaa ganacsiyada cusub illaa 15%

## Dhisida kaabayaasha dhaqaalaha, helidda wershadayn laga simanyahay iyo hal-abuurnimo cusub

Iyadoon la helin kaabayaal dhaqaale iyo Tiknolojiyad saxa, wadamada soo korayaa ma suurto gelin karaan ka faa'iidaysiga khayraadkooda dabiiciga ah. Wershadayntu waxay qayb libaax ka qaadataa hal-abuurnimada iyo cilmi baadhista, kuwaa soo muhiim u ah shaqo abuurka, yaraynta saboolnimada, sinnaan la'aanta ragga iyo haweenka, hagaajinta shaqada iyo helitaanka daryeel caafimaad iyo wax-barasho. Wadajir keena ayaynu ku heli karnaa wershadayn iyo tiknolojiyad horumara. Yoolkani 8 bartilmaameed ayuu leeyahay oo kala ah:

9.1 Waa in la dhisaa kaabayaal dhaqaale oo tayo leh; la iskuna hallaynkaro sida kaabayaasha dhaqaale ee heer gobol iyo kuwa xuduudaha iskaga gudba si ay gacan uga gaystaan koboca dhaqaalaha iyo daryeelka-bulshooyinka dhammaan.

9.2 Dhiirigelinta wershadeyn waarta, 2030ka waa in si weyn sare loogu qaadaa heerka wershadayntu ka qaadato shaqo abuurka iyo wax soo saarka maxalliga ah iyadoo la waafajinayo xaaladda dhaqaale ee waddan kasta siiba waddamada horumarkoodu liito.

9.3 Waa in la kordhiyaa helitaanka wershadaha yaryar iyo shirkadaha, gaar ahaan wadamada soo koraya sida in la suurtogeliyo helitaanka dhaqaale iyo maalgelin iyo weliba suuq geyn qiimo leh.

9.4 2030ka, waa in la cusbooneysiiyaa lana casrigareeyaa kaabayaasha dhaqaale iyo wershadaha si ay u waaraan, sida in sare loo qaado habsami u adeegsiga kheyraadka iyo dhaqangelinta tiknolojiyad casri ah oo nadiifa; deegaankana u wanaagsan iyo wershadeyn ay yeeshaan dhammaan wadamada caalamku iyadoo loo tixgelinayo wadan iyo taagtii.

9.5 Waa in la horumariyaa lana casriyeeyaa qaybta tikinolojiyadda iyo awoodda wershadaynta ee waddan kasta, gaar ahaan wadamada soo koraaya sida in 2030ka la dhiirigeliyo ikhtiraaca iyo tirada cilmibaadhista ay sameeyeen u heelanayasha horumarintu (sida in la ogaado inta milyankii qofba cilmi baadhis samaysa) iyo hay'adaha dawliga iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee sameeya cilmibaadhisyada.

9.6 Waa in la meel mariyaa hirgelinta kaabayaal adkaysi leh oo waara oo ay helaan waddamada soo korayaa, iyadoo la fudeynayo helitaanka dhaqaale, tiknolojiyad iyo taageero farsamo oo la siiyo waddamada Afrika, waddamada koritaankoodu liito, waddamadda aan badda lahayn iyo 18ka jasiiradood ee soo koraya.

9.7 Waa in la taageeraa horumarinta tiknolojiyadda maxalliga ah, cilmi baadhisteeda iyo ikhtiraaca maxalliga ah ee wadamada soo koraya, iyo xaqiijinta siyaasado wax ku ool ah oo dhiirigeliya kala duwidda wershadaha iyo waxyaabaha badeecadda qiimaha geliya.

9.8 Waa in si weyn loo kordhiyaa si siman u helidda xogta iyo xidhiidhka tiknolojiyadda casriga oo lagu helo qiimo jaban sida in wadamada soo korayaa helaan internet fiican 2020ka.

# 10 DHIMISTA KALA SARAYNTA

Reduced Inequalities

8da Qof ee Ugu qanisan aduunyadu Waxay haystaan hanti u dhiganta inta ay haystaan 3.6 bilyan

Laguma noolaankaro aduunyo horumarku dhab ka yahay; haddii aan la helin u sinaanta fursadaha ee wadamada iyo shucuubtaba. Sinaantu waa kuruska ugu sareeya horumarka waara. Wadajir ayaynu ku xoojin karnaa kuna hirgelin karnaa kawada qaybgalka koboca arrimaha bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasaddaba; inaga oon u eegahayn da', jinsi, laxaad-qab, midab, qoomiyad, isir, diin, dhaqaale ama wax kale toona. Yoolkani wuxuu leeyahay 11 bar-tilmaameed oo kala ah:

10.1 Dhimista Sinnaan la'aanta bulshooyinka iyo waddamada dhexdooda, sida u sinnaan la'aanta dhaqaalaha, fursadaha iwm.

10.2 2030ka, waa in si weyn loo xaqiijiyaa loona meeleeyaa koritaanka dhaqaale ee boqolkiiba afartanka (40%) ugu nolosha hooseeya bulsho kasta, weliba xaddi aad uga sareeya celiceliska heerka koritaanka dhaqaale ee wadankaas.

10.3 2030ka, waa in la xoojiyaa sarena loo qaadaa ka wada qayb-galka shucuubta ee arrimaha bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda; iyadoon loo eegahayn da', jinsi, laxaad qabid, isir, jinsiyad, asalka, diinta, xaaladda dhaqaale ama noockasta oo kale oo lagu kala sarreyn karo.

10.4 Waa in la xaqiijiyaa in loo sinnaado fursadaha iyo in la dhimo wax yaabaha ka dhasha kala sareynta shucuubta; sida dabargoynta shuruucda midab kala sooca, siyaasadaha iyo hab-dhaqameedyada iyo weliba arrimaha kale ee gacanta ka gaysta sinnaan la'aanta.

10.5 Dhaqan gelinta siyaasado, gaar ahaan siyaasadaha

dhaqaalaha, mushahar bixinta, ilaalinta bulshada iwm iyadoo looga jeedo in si weyn loogu guuleysto sinnaanta bulshada.

10.6 Horumarinta qaanuunka, la socodka suuqyada iyo hay'adaha maaliyadda ee caalamka iyadoo la hirgelinayo xeerar badhitaaraya arrimahaas.

10.7 Sare uqaadista matelaadda iyo codka waddamada soo korayaa leyihiin; marka la qaadanayo go'aamada dhaqaale ee caalamiga ah iyo hay'adaha dhaqaalaha khuseeya; si loo helo hay'ado dhaqaale oo wax ku ool ah, lagu kalsoonaan karo oo lala xisaabtami karo oo sharci ah.

10.8 Fududeynta habsami isugu socodka iyo dhaqdhaqaaqa dadka, ammaanka oo joogto ah oo masuuliyadi ku dheehantahay; iyadoo la fulinayo siyaasado iyo qorsheyaal socdaal oo si wanaagsan loo maareeyey.

10.9 Hirgelinta mabaadi' iyo heshiisyo gaar u eegaya taageeridda waddamada soo koraya; gaar ahaan kuwa koritaankoodu hooseeyo, iyadoo la eegayo lana tixgelinayo heshiisyadii ganacsiga caalamiga ah.

10.10 Waa in la dhiirigeliyaa helitaanka gargaar horumarineed oo rasmi ah iyo isu gudubka maaliyadda sida suurtogelinta maalgelin dibadeed oo toos ah oo ay helaan waddamada baahida weyn u qaba, gaar ahaan wadamada horumarkoodu liito sida Afrika iyo jasiiradaha yaryar ee soo koraya iyo waddamada aan badaha lahayn iyadoo lagala shaqaynayo qorsheyaashooda horumarineed.

10.11 2030ka waa in loo soo yareeyo boqolkiiba 3 kharashaadka macaamil ganacsi ee xawaaladaha soo galootiga, iyo in la baabi'iyo xawaaladaha qaada khidmadaha ka badan boqolkiiba 5.

# 11 MAGAALOOYIN IYO BULSHOOYIN XASILOON

Sustainable Cities and Communities

½ dadka aduuynadu
Waxay ku noolyihiin
magaalooyinka

## Waa in laga dhigaa caasimadaha iyo degsiimooyin kaba qaar loo dhanyahay, nabad ah, una adkaysta dhibaatooyinka

2030ka, ugu yaraan 60% bulshada caalamku waxay ku noolaanayaan magaalooyinka, korodhka ugu badanina wuxuu ka dhici doonaa wadamada soo koraya. Magaalaynta xad dhaafka ahi waxay culeys ku tahay adeegyadii sida helida biyo nadiifa, habka bullaacadaha, deegaanka iyo caafimaadka dadweynahaba. Aynu hirgelino ka faa'iideysiga tiknolojiyada iyo adeega dadweynaha caasimadaha si ay u noqdaan goobo qofkastaa uu amaan heli karo kuna haboon in la yimaado. Yoolkani wuxuu leeyahay 10 bartilmaameed oo kala ah:

11.1 2030ka waa in lawada helo guryo qiimo jaban oo ammaan ah iyadoo la fidinayo adeegga aasaasiga ah iyo casriyeynta deegaamada isku raranta ah ee dadka saboolka ahi degan yihiin.

11.2 2030ka waa in la helaa nidaamka isgaadhsiinta gaadiidka oo la isku hallayn karo, ammaan ah oo qiimo jaban ku kaca, wanaajinta ammaanka waddooyinka, gaar ahaan ballaadhinta gaadiidka dadweynaha, iyadoo niyadda lagu hayo baahidda dadka nugul sida dumarka, caruurta iyo dadka naafada iyo weliba dadka da'da ah.

11.3 2030ka waa si weyn hore loogu horumariyaa magaaleyn waarta iyo tayaynta awoodda ka qayb qaadashada deegaamaynta bani aadamka, qorsheynteeda iyo maar-eynteedaba oo ay helaan wadamada caalamka oo dhan.

11.4 Waa in la xoojiyaa dadaalada lagu ilaalinayo dhaqamada soojireenka ah ee la iska dhaxley ee caalamka dhaxal-

tooyada ah ee caalamka.

11.5 2030ka, waa in si weyn hoos loogu dhigaa tirada dhimashada iyo tirada dadka ku wax yeellooba iyo weliba hantida ku burburta masiibooyinka caalamka ka dhaca sida masiibooyinka biyuhu keenaan iyo wixii la hal maala iyadoo si gaara loo ilaalinayo meelaha dadka nuguli ku noolyihiin.

11.6 2030ka waa in la dhimaa waxyeelada shakhsiyaadka kasoo gaadha saamaynta taban ee ka dhalata magaaleynta sida in tixgelin gaara la siiyo fayo qabka hawada iyo maareynta qashinka.

11.7 2030ka waa in la hubiyaa helitaanka goobo dadweyne oo cagaaran oo badqaba oo ay helaan dumarka, caruurta iyo dadka da'da ah iyo weliba dadka naafada ah.

11.8 Waa in gacan la siiyaa hagaajinta dhaqaalaha iyo daryeelka bulshada iyadoo lagu xidhayo badqabka deegaanka magaalo iyo miyiba iyadoo la xoojinayo qorsheyaasha heer qaran iyo heer gobolba ee arrimahaas la xidhiidha.

11.9 2020ka waa in si weyn loo kordhiyaa tirada magaalooyinka iyo deegaamada meel mariya fuliyana siyaasado iyo qorsheyaal wax ku ool ah oo beekhaaminaya kheyraadka ama u adeegsanaya kheyraadka si masuuliyadi ku jirto, xalliyana dhibaatoyinka ka dhashay wasakhawga/dikhawga hawada iyo u adkeysiga masiibooyinka iyo helitaanka habab dhamaystiran oo lagaga gaashaamanayo laguna maamulayo masiibooyinka.

11.10 Ka caawinta waddamada soo koraya helitaanka dhaqaale iyo taageerooyin farsamo oo ka caawiya inay dhistaan qorsheyaal horumarineed ayna dhaqan geliyaan iyagoo khibradooda adeegsanaaya.

# 12 ISTICMAAL MASUULIYAD KU DHISAN

Responsible Consumption

## Helidda isticmaal iyo wax soo saar sugan

Wax soo saar iyo isticmaal sugani waa helidda wax soo saar badan. Waxaa la saadaalinayaa in bulshada caalamku gaadhi doonto 2050 ka toban bilyan, in culeysyo kale ku soo kordhaan koonkani waxay gabaabsi ka dhigaysaa khayraadka. Aynu xoojinno helidda qaab nololeedyo la isku hallayn karo, taasoo xaqiijin karta in qofkastaa helo cunto, biyo tamar, daawo IWM. Yoolkani wuxuu leeyahay 11 bar-tilmaameedyo kala ah:

12.1 Waa in la fuliyaa qorshe wada shaqayneed oo 10 sano ah oo ku saabsan xasilinta wax soo saarka iyo kharash gareynta oo ay dhammaan waddamada caalamku ka wada qaataan tallaabo cad iyadoo waddamada horumarayna hogaanka qaadanayaan; iyadoo xisaabtana lagu darsanayo awoodda iyo kartida waddamada soo korayaa u leeyihiin arrintaas.

12.2 2030ka waa in lagu guuleystaa xasilinta iyo habsami u isticmaalka kheyraadka dabiiciga ah ee dunida oo dhan.

12.3 2030ka waa in kala badh la dhimaa dayaca maceeshada ee xilliga isticmaalka iyo tafaariiqeynta (iibinta) iyo weliba xilliga soo saarka iyo gaddida.

12.4 2020ka waa in la xaqiijiyaa habsami u maamulidda kiimikooyinka deegaanka wax yeeleeya iyo qashinka iyadoo la ixtiraamayo lana fulinayo qaababka wadashaqayneed ee caalamiga ah. sidoo kalena waa in si weyn loo dhimaa wasakhaynta hawada, biyaha iyo carrada si loo yareeyo saamaynta ay sumowgaasi ku yeelato caafimaadka aadamaha iyo deegaankaba.

12.5 2030ka waa in si weyn loo dhimaa soo saarka wasakhda iyadoo loo marayo ka hortag, dhimis, dib u wershadayn iyo dib u isticmaalka qashinka.

12.6 Waa in lagu dhiirigeliyaa shirkadaha waaweyn, gaar ahaan shirkadaha caalamiga ah inay dhaqangeliyaan hab-dhaqanno sugan oo ay ku soo saaraan warbixinno furan oo qiimo leh.

12.7 Waa in la dhiirigeliyaa wax gadashada iyo iibka furan (suuqa xorta ah) iyadoo loo raacayo siyaasadaha iyo mudnaanaha ay leeyihiin waddamadu

12.8 2030ka waa in la hubiyaa in qofkastaa meeshuu joogaba helo xogo iyo wacyigelin ku saabsan xasilinta horumarka caalamka iyo horumarinta nolosha dadkaba.

12.9 Waa in la taageeraa sidii waddamada soo korayaa u xoojin lahaayeen farsamooyinka iyo tiknolojiyadda casriga ah iyo awoodooda; si loo gaadho horumar xasilloon iyo wax soo saar iyo isticmaal isku dheelitiran.

12.10 Waa in la hirgeliyaa lana fuliyaa habab iyo qaabab lagu kormeerayo samaynta horumar xasiloon iyadoo la hirgelinayo dalxiis abuura shaqooyin sarena u qaada dhaqamada iyo wax soo saarka maxalliga ah.

12.11 Waa in si macno leh wax looga qabtaa kabidda dhaqaale ee lagu bixiyo shidaalka laga hagaajiyo haraadigii hore ee noolaha; taasoo dhiirigelineysa isticmaal wasakhaysan, meeshana ka saaraysa dhab ka sheegista xogta suuqa ee heer qaran, sida in dib loo qaabeeyo cashuuraha, joojinta kabka dhaqaale ee waxyeelada leh; iyadoo laga dareen celinayo wax yeellada deegaanka. Waa in lagu xisaabtamaa baahiyaha iyo xaaladaha gaarka ah ee wadamada soo koraya, iyadoo laga taxadirayo waxyee-leynta horumarka dadka saboolka ah.

# 13 WAX KA QABADKA CIMILADA

Climate Action

1-4 fuudh
Intee ayuu heerka badu sare u kacayaa 2100 ka

## Ka qaadista tallaabo degdeg ah la dagaalanka isbedelka cimilada iyo saameynteedaba

Wadamada wershedaha hore uga maray waxay bedeleen isu dheelitirka geyiga ee meertada Karboonka ee 150 kii sano ee ugu danbeeyey iyagoo gubay xaddi badan oo noolaha dhulka ku raagay ah. Wasakhawga/Dikhowga cimiladu wuxuu halis u yahay in la khalkhaliyo horumarka waara isagoo bedelaya jawigii ku haboonaa wax soo saarka cuntada isagoo kordhinaya heerka badda; bara kicinayana bulshooyinka xeebta ku nool. Waa in aynu wacyigelinta kordhino kuna tartansiino/tirtirsiino hogaamiyeyaasha aduunku inay la dagaalamaan isbedelka cimilada. Yoolkani 5 bar-tilmaameed ayuu leeyahay oo kala ah:

13.1 Waa in dhammaan waddamada caalamku taabageliyaan u adkeysiga iyo awoodda laqabsi ee khataraha ka dhasha isbedelka cimilada iyo masiibooyinka dabiiciga ah.

13.2 Wax ka qabashada is bedelka cimilada waa in la dhex-geliyaa siyaasadaha, xeeladaha iyo qorsheyaasha qaran ee wadan kasta.

13.3 Waa in la horumariyaa aqoonta, wacyigelinta bani'aadamka iyo awoodda hay'adaha ee xal u helidda is bedelka cimilada, la qabsiga iyo hoos u dhigidda saamaynteeda sida in la dhiibo digniino goor hore ah.

13.4 Waa in la fuliyaa ballan qaadyadii ay waddamada horumaray ka sameeyeen kulankii qaramada midoobay ee ahaa in la xaqiijiyo yoolka ah in 100 bilyan oo doolar si wadajir ah loo ururiyo 2020, si loo waajaho baahiyaha wadamada soo koraaya u qabaan qaadista tallaabo macno leh oo si hufan loo fuliyo si buuxdana loogu dhaqangeliyo

sanduuqa cimilo nabdoon (Green climate Fund).

13.5 Waa in la dhiirigeliyaa sare u qaadista tayada iyo awoodaha lagu meelmarin karo maareyn iyo qorshayn waxku ool ah oo ay waddamada soo koraya iyo jasiiradaha yaryari u yeeshaan isbedelka cimilada. Iyadoo tixgelin gaara la siinayo Haweenka, dhallinyarada iyo bulshada nugul.

# 14 NOLOSHA BIYAHA KA HOOSAYSA

**Life Below Water**

2.6 bilyan Qof ayaa si toosa ugu tiirsan cuntada badda oo ka hela borotiinkooda

## Kaydinta iyo habsami u adeegsiga bad-weynta, badaha, khayraadka badda si loo helo horumar waara

Badaha waa weyn, iyo badaha kaleba waxaa kharibey oo si xun u isticmaaley bani'aadanka sida wasakhaynta badda, xaalufinta kallunka, burburinta deegaanka badda. Badaha waa weyni waxay daboolaan saddex meeloodow meel aduunka, waxay hoy u yihiin ku dhawaad 200,000 noole. Khayraadka badda waxa ku nool in ka badan 3 bilyan oo qof. Weynu badbaadin karnaa badeheena; haddii aynu hore ugu dhaqaaqno waxaynu ilaalin karnaa badeheena iyo khayraad kooda ba. Yoolkani wuxuuna leeyahay 10 bartilmaameed oo kala ah:

14.1 2025ka waa in laga hortagaa, si weynna loo dhimaa wasakhaynta biyaha badda, gaar ahaan waxyaabaha dhulka ka dhaca ee badda wasakheeya sida hadhaaga burburka badda iyo waxyaabaha duxda leh.

14.2 2020ka, waa in si weyn loo maareeyaa loona ilaaliyaa xaaladda nololeed ee baddaha iyo xeebaha si looga fogaado in saamayn xun ay ku yeelato wasakhawga meelahaas iyadoo la xoojinayo u adkeysigooda iyo in la sugo awoodooda ay dib ugu hagaajisan karaan marka wax dhacaan si loo helo bado wax soo saar leh oo bad qaba.

14.3 Waa in la dhimaa lana waajahaa saamaynta ka dhalata aysiidha lagu shubo badda iyadoo lagaga hortegaayo wada shaqayn caalami ah oo arrintaa laga yeesho.

14.4 2020ka waa in si wax ku ool ah loo beekhaamiyaa isticmaalka kalluunka iyadoo lasoo afjaraayo kalluumaysiga wax yeellada leh, sharci darrada ah iyo dhaqamada jillaafasho ee wax burburinaya, iyadoo la fulinayo qorsheyaal maamul oo

sayniska ka duula, si xilli kooban oo macquul ah dib loogusoo celiyo kaydka kalluunka.

14.5 2020ka waa in boqolkiiba 10 la dhaqaaleeyaa xeebaha iyo meelaha badaha u dhaw dhaw, iyadoo la raacayo xeerarka heer qaran iyo heer caalamiba lagana duulayo xogta rasmiga ah ee arrintaa laga hayo.

14.6 2020ka waa in la mamnuucaa noocyo gaara oo ah kabidda dhaqaale ee la siiyo kalluumaysatada taasoo gacan ka gaysata kalluumaysiga xaalufinta ah, kalluumaysiga sharcidarrada ah iyo kalluumaysiga aan nidaamsanayn, iyadoo laga fogaanaayo in lasoo rogo noocyo cusub oo kabid dhaqaale ah, iyadoo la tixgelinaayo heshiisyadii gaar ka ahaa ee khuseeyey in waddamada soo korayaa ay galaan; qaybna ka noqdaan suuqa ganacsiga caalamiga ah iyo doodaha la halmaalaba.

14.7 2030ka waa in sare loo qaadaa faa'iidooyinka dhaqaale ee ay waddamada soo korayaa ka helaan khayraadka badda, oo ay ku jirto habsami u maamulidda kalluumaysiga, naaxinta xayawaanka iyo dalxiiskaba.

14.8 waa in la kordhiyaa cilmiga sayniska, iyadoo la horumarinayo cilm-ibaadhista iyo isweydaarsiga tiknolojiyadda iyadoo la tixgelinayo shuruudaha iyo tilmaamaha isu gudbinta tiknolojiyadda Badaha ee ururka Baddaha caalamiga ahi dejiyay, si loo horumariyo badqabka Badaha iyo nooleheedaba ee waddamada soo koraya.

14.9 Waa in fursad la siiyaa kalluumaysatada yaryar in ay jillaabtaan suuqna geeyaan khayraadka Badda.

14.10 Waa in la horumariyaa dhaqaaleynta iyo habsami u isticmaalka Baddaha iyo kheyraadkoodaba iyadoo la fulinayo xeerarka caalamiga ah sida ku cad heshiiska qaramada midoobay ee ku saabsan sharciga Badaha (UNCLOS), kaasoo dejiyay qaababka loo dhaqaalaynayo loona hubinayo habsami u adeegsiga Badaha iyo kheyraadkoodaba sida lagu sheegey faqradiisa 158 ee halku dhigeedu yahay mustaqbalka aan doonayno (future we want),

# 15 NOLOSHA BERRIGA

**Life on land**

Waxaynu isticmaalaa
In ka badan 25% Khayraadkii
uu kownku xamili karaayay
sannadkiiba

Illaalinta, dib u soo celinta iyo hagaajinta hab-sami u isticmaalka nidaamka deegaanka ee dabiiciga ah, hab-sami u maamulidda kaymaha, la dagaalanka xaalufka iyo hakinta burburinta dhulka iyo carraguurka nooleyasha kala duwan (Halt biodiversity loss). Yoolkani wuxuu leeyahay 11 bartilmaammed oo kala ah:

15.1 2020ka, waa in la dhaqaaleeyaa, dibna loo habeeyaa habsami u isticmaalka bay'adda biyaha, iyo dhaqaaleynta biyaha xareedda ah ee dhulka, sida dhul kaymeedka, biyo qabatinyada iyo buuralayda.

15.2 2020ka, waa in la dhaqan geliyaa dhamaan noocyada maamul ee kaymaha, joojinta xaalufinta, dib u abqaalidda kaymaha iyo in si weyn sare loogu qaado dhireynta iyo soo celinta kaymaha caalamka.

15.3 2030ka waa in si weyn loola dagaalamaa xaalufka, lasoo celiyaa nabaadkii yaraaday sida dhulkii ay saamaysay xaalufku, abaaruhu iyo daadadku iyo xaqiijinta dib u hagaajinta dhulkii wax yeelloobay.

15.4 2030ka waa in la hubiyaa dhaqaaleynta iyo ilaalinta hab-dhiska biyo qabatinka ee buuralayda iyo noolaha ku dul iyo hoos nool, si loo horumariyo buuralayda; qaybna ay uga noqoto horumarka waara ee caalamku raadinaayo.

15.5 Waa in tallabo degdeg ah laga qaadaa sidii loo dhimi lahaa waxyeelidda dabeecadda dhulka, hakinta dhimashada xayawaanka iyadoo 2020ka la xaddidayo; lagana hortagayo ugaadhsiga noocyada xayawaan ee dabar go'aya.

15.6 Waa in si siman loo wadaagaa, saami isku mid ahna laga helaa faa'iidooyinka hiddo sidaha kheyraadka iyadoo la horumarinayo helitaanka khayraadkaas sidii caalamku ku heshiiyay.

15.7 Waa in tallaabo degdeg ah laga qaadaa joojinta ugaadhsiga sharcidarrada ah, ka ganacsiga noocyada xayawaanka iyo dhirta aan la ogoleyn, iyadoo la eegayo baahida iyo ugaadhsiga duurjoogta.

15.8 2020ka, waa in la meelmariyaa shuruuc ilaalinaysa hoosna u dhigaysa saamaynta ka dhalata xayawaanka soo galootiga ahi (cusubi) ku keeno biyaha iyo dhulkaba iyadoo la maamulayo saamayntaas.

15.9 2020ka, waa in la dhexgeliyaa qorsheyaasha horumarineed iyo kuwa ladagaalanka saboolnimadaba ee heerqaran iyo heerka maxalliga ahba ilaalinta iyo qiimeynta xayawaanada

15.10 Waa in la ururiyaa si weynna loo kordhiyaa dhaqaalaha si loo dhaqaaleeyo si wanaagsanna loogu isticmaalo noolaha biyaha. iyadoo lagu maalgelinayo waddamada soo korayaa siday habsami ugu maamuli lahaayeen dhaqaaleynta deegaanka iyo keymaha.

15.11 Waa la casriyeeyaa taageerada caalamku ku bixiyo la dagaalanka ugaadhsiga sharci darrada ah, ka ganacsiga noocyada aan la ogoleyn iyadoo sare loo qaadayo helitaanka nolol wanaagsan ee bulshooyinka oo dhan.

# 16 NABAD, CADAALAD IYO HAAYADO KARTI LEH

**Peace, justice and strong institutions**

Sannadkii u danbeeyey, kharashka aduunyada kaga baxay tacadiyadu wuxuu dhamaa $14.3 tiriliyan

Hirgelinta Shucuub nabada oo isku duuban si loo helo horumar waara, bixinta adeeg cadaaladeed oo cidkasta gaadha iyo dhisida hay'ado karti leh, lala xisaabtami karo heer kasta,

Waxaynu hilaadin karnaa sinaan dhab ah iyo aduunyo xasiloon haddii aynu helno bulshooyin nabdoon oo wada jira. Taas macneheedu waa inaynu dhinnaa denbiyada, xasaradaha, iyo tacadiyada. Waa in la joojiyaa hubka sharci darrada ah iyo ka ganacsiga mukhaadaraad ka. Hay'adaha dawliga ah ee aynu dhamaanteen ku tiirsanahayna waa inay yeeshaan karti, isla xisaabtan iyo hufnaan. yoolkani wuxuu leeyahay 12 bar-tilmaameed oo kala ah:

16.1 Waa in si weyn loo dhimaa noockasta oo tacaddi ah iyo dhimashooyinka ka dhashaba meel kasta oo caalamka ah.

16.2 Cidhibtiridda faraxumeynta, tacaddiyada, ka ganacsiga jidhka bani aadamka iyo dhimashooyinka ka dhasha iyo weliba noockasta oo tacaddi ah oo uu ku jiro jidh dilka caruurtu.

16.3 Hirgelinta sharciyada heer qaran iyo heer caalami ah oo lagu hubinayo helitaanka cadaalad loo simanyahay.

16.4 2030ka, waa in siweyn loo dhimaa isu socodka maaliyadda iyo hubka sharci darrada ah; iyadoo la xoojinayo kasoo kabashada iyo soo celinta hantida la lunsaday, iyadoo lala dagaalamayo noockasta oo denbi wadareed ah.

16.5 Waa in si weyn loo dhimaa noockasta oo musuq-maasuq iyo laaluush ah.

16.6 Waa in la sameeyaa hay'ado hawlkar ah, lala xisaabtami karo oo daahfuran heer kasta oo ay yihiinba.

16.7 Waa in loo sinnaadaa lagana wada qayb qaataa metelaadda iyo gaadhista go'aamada heerkasta oo ay yihiin.

16.8 Waa in la ballaadhiyaa lana xoojiyaa ka qaybgalka wadamada soo korayaa ku leeyihiin hay'adaha maamul ee caalamiga ah.

16.9 2030ka, waa in la suurto geliyaa helitaanka aqoonsi sharci ah oo uu helo qofkasta oo caalamka ku nooli kaa soo ay ku jirto shahaadada dhalashada.

16.10 Waa in la hubiyaa helitaanka macluumaadka (information access) iyo ilaalinta xorriyaadka asaasiga ah iyadoo la raacayo sharciyada qaran iyo heshiisyada caalamiga ah.

16.11 Waa in la tayeeyaa hay'adaha ku shaqada leh cadaaladda ee heer qaran, sida helitaanka wada shaqayn heer caalami ah oo lagu dhiso awoodooda iyo kartidooda dhinac kasta, gaar ahaan wadamada soo koraya si looga hortago tacaddiyada; loo lana dagaalamo argagixisada iyo denbiyada abaabulan.

16.12 Waa in la unkaa lana dhaqan geliyaa sharciyo iyo siyaasado aan takoor lahayn oo horseeda horumar waara.

# 17 ISU KAASHIGA YOOLAL KAN

Partnerships for the goals

½ dadka ee ku nool saboolnimada daran ee 1990kii waxba iskama bedelin

## Xoojinta hanaanka fulinta iyo soo nooleynta iskaashiga caalamka ee fulinta Horumar waara

Wuxuu caalamku u soo joogay Yoolashii hurumarineed ee hore, 17kan yoolna waxay abaarayaan xididada saboolnimada. Waxaynu leenahay habkii iyo khibraddii aynu kaga guuleysan lahayn waxaa bud dhig u ah sida qofkastaa u fahmo inuu qayb ka yahay xaqiijinta. Yoolkani wuu leeyahay bar-tilmaadeedyadan:

### Arrimaha maaliyadda:

17.1 Waa in la xoojiyaa abaabullidda wax soo saarka maxalliga ah (local resource mobilization) oo lagu kaabay taageero caalami ah oo la siiyo waddamada soo koraya, si looga tayeeyo awooda ururinta cashuuraha iyo dakhliyadda kale.

17.2 Waa in waddamada horumay si dhamaystiran u fuliyaan ballanqaadyadoodii ahaa inay gargaarka horumarineed ee rasmiga gaadhsiiyaa 0.7% tacabweynaha qaramadda (GDPs) taasoo la siinayo waddamada soo koraya iyadoo sidoo kale 0.15 illaa 0.20 boqolkiiba la siinayo dalalka horumarkoodu gaabinayo (liito).

17.3 Waa in la abaabulo ilo dhaqaale oo dheeraada oo ay helaan dalalka soo korayaa

17.4 Waa in laga gacansiiyaa in waddamada soo korayaa helaan deynta wakhtiga dheer iyadoo la hirgelinayo siyaasado ujeedadoodu tahay dhiirigelinta deymaha maalgelinta iyo fududeynta deynta, dib u eegista daymaha hore iyadoo la dhiirigelinayo in dalalka saboolka ah laga cafiyo deymaha si dhibta looga fududeeyo.

17.5 Meelmarinta iyo hirgelinta maalgashiga dalalka horumarkoodu liito.

### Tiknolojiyadda oo leh saddex bartilmaameed oo muhiim ah waxaanay kala yihiin:

17.6 Waa in la dhiirigeliyaa in dunidu cidhif ka cidhif iyo heer gobolba isu kaashato helitaanka saynis, tiknolojiyad iyo fikradaha cusub iyadoo la horumarinayo u wadaagista aqoonta hab la isla wada ogolyahay iyadoo la xoojinayo madalaha jira sida qaramada midoobay iyo habab kale oo heer caalami ah oo is kaabaya.

17.7 Higelinta iyo dhiirigelinta, isu gudbinta, is dhaafsiga iyo wadaagist tiknolojiyadda deegaanka u wanaagsan oo ay helaan dalalka soo korayaa iyadoo loo marayo habab la isla ogolyahay.

17.8 Waa in si buuxda loo dhaqangeliyaa bangiga tiknolojiyadda iyo sayniska iyo weliba ikhtiraaca iyadoo 2017ka dalalka soo korayaa si buuxda u adeegsadaan tiknolojiyadda casriga ah ee isgaadhsiinta iyo xidhiidhka.

### Awood dhisid (Capacity building)

17.9 Horumarinta taageerada caalamku ku bixiyo dhisidda awoodaha wadamada soo koraya; si looga taageero qorsheyaashooda heer qaran ee lagu fulinayo yoolasha horumarka waara; sida in cidhif illaa cidhif la is kaashado.

### Ganacsiga (Trade)

17.10 Waa in la hirgeliyaa xeerar guud, oo furan, oo aan faquuqid lahayn iyo heshiisyo ganacsi oo loo simanyahay (faa'iidada loo simanyahay) oo hoostegaya Hay'adda ganacsiga aduunka, iyadoo la tixgelinayo heshiiskii lagu gaadhay wadahalkii shirkii Dooxa (Qadar).

17.11 Waa in si weyn loo kordhiyaa wax dhoofinta wadamada soo koraya, gaar ahaan in la libin-laabo saamiga ay wadamada horumarkoodu hooseeyaa ku leeyihiin badeecadda caalamka 2020ka.

17.12 Waa in dhakhso loo fuliyaa in wadamada horumarkoodu hooseeyo ka helaan cashuur dhaaf, iyo qoondayn gaara (qouto) oo xilli dheer ah suuqa caalamka; si waafaqsan nidaamyada Hay'adda ganacsiga aduunka.

### Arrimaha nidaamka (systematic issues)

wadashaqaynta hay'adaha iyo siyaasadda (policy and institutional coherence )

17.13 Xoojinta xasiloonida dhaqaalaha caalamka, iyadoo loo marayo siyaasado isku dubaridan oo wada shaqaynaya.

17.14 Xoojinta wada shaqaynta siyaasadeed ee horumarka waara

17.15 Xurmaynta hogaanka iyo siyaasada wadan kasta si loo unko loona fuliyo siyaasado lagu yareeyo saboolnimada horseedna u noqda horumar waara.

### Iskaashiga daneeyayaasha (multi-stakeholder partinership)

17.16 Xoojinta isu kaashiga caalamka ee horumarka waara, kaasoo loo marayo iskaashiga daneeyayaal badan si loo abaabulo loona wadaago aqoonta, khibradda, tikinolojiyadda iyo dhaqaalaha, si dhamaan wadamada caalamku u wada xaqiijiyaan yoolasha horumarka waara, gaar ahaan wadamada soo korayaa.

17.17 Dhiirigelinta iyo xoojinta iskaashi wax ku ool ah oo dhexmara Hay'adaha dawliga ah, kuwa gaarka loo leeyahay iyo ururada bulshada rayidka ah oo ku dhisan khibrad iyo khayraad wadaag.

### Xogta, kormeerka iyo isla xisaabtanka (dara, monitoring and accountability)

17.18 2020ka, Waa in la xoojiyaa awooda iyo kartida wadamada soo korayaa, gaar ahaan kuwa horumarkoodu liito iyo wadamada jasiiradaha yaryari u leeyihiin, inay si weyn u horumariyaan helin-taanka xogo tayo sare leh, wakhtiga ku haboon, oo u kala hufan sida dakhliga, jinsiga, da'da, jinsiyadda, isirka, xaaladda soo haajiridda (migratory status), naafada, goobta deganaanshaha iyo siyaabaha kale ee ku haboon xaaladaha heer qaran ee wadamada.

17.192030ka waa la xoojiyaa dadaalada hadda jira ee lagu dhud-huminayo guulaha horumarka waara taasoo loo marayo wax soo saarka maxalliga ah iyo taageeridda tirakoobyada awood dhisidda wadamada soo koraya. ah iyo taageeridda tirakoobyada awood dhisidda wadamada soo koraaya.

Yoolasha horumar waara oo sidoo kale loo yaqaanno ajandaha aduunka ee horumarka waara waxaa si shakhsi ah u turjumay **Cabdiraxmaan Cismaan Gaas** oo bartay cilmiga  horumarinta (Development Studies);
Imikana diyaariya shahaadada sare ee Cilmiga horumarka waara iyo Dublomasiyadda (PhD in Sustainable Development and Diplomacy).